

Sida aad ilmahaaga Ugala Hadlayso Nafanimadooda

Lahaanshaha dareen adag ee awoodaha, tayoooyinka, xiiseyaasha, iyo qiimeyaasha ayaa qaybo muhiim ah ka ah u doodista naftaada. Wacyiga qofka da'yarka ah ee ku aadan sida naafadiisu u saamayn karto shaqadiisa, bulshada, ama waxbarashadiisa ayaa qayb wayn ka ah hawshaan.

Sida ku cad Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA), waalidiinta ayaa door wayn ka ciyaara u doodista ilmahooda, laakiin sida ku cad Sharciga Ameerikaanka Naafada ah (ADA), qofka da'yarka ah waa inuu qudhiisu aqoonsado un doodo naftiisa kadib dugsiga.

Halkaan waxaad ka helayso tilmaamaha qaar ee la hadlida cunugaaga:

- Xili hore bilow oo samee wax ka badan hal wada sheekaysi muddo intii ah.
- Run sheeg, taageero muuji, oo warkaagu ha cadaado.
- Dhageyso su'aalaha iyo walaacyada cunugaaga.
- U bayaami erayada caafimaadka.
- Adeegso erayo iyo jumlado ka caawinaaya cunugaaga inuu fahmo.
- Ka hadal awoodihiisa, waxa uu ku fiican yahay iyo waxa uu u baahan yahay in laga taageero, qof kasta, oo aad adigu ku jirto, ayaa leh baahiyo waana inuu u dooda qaab kasta oo ay tahayba. Keli kuma ahan khibradaan.
- Kala hadal xeeladaha iyo taageerooyinka ka caawin kara dhinacyada u baahan taageerada. Kadibna, isticmaal fursadaha fasalka, guriga, iyo bulshada si aad uga caawiso cunugaaga inuu u doodo naftiisa iyo xirfadaha go'aan gaarista.

Halkaan waxaad ka helayso qaar kamid ah bilaabeyaasha jumlada si looga caawiyo cunugaaga barashada xirfadaha u doodista naftiisa markuu dugsiga joogo:

- Cadeynta (ama naafadu) waa...
- Tan ayaa ka dhigan in aan u baahan nahay in laga iga caawiyo...
- Qaar kamid ah awoodahayga/meelaha aan taageerada uga baahan nahay ayaa ah...
- Fasalka dhexdiisa, waxaan u baahan nahay in la iga caawiyo...
- Higsiyadeyda mudada gaaban/mudada dheer...
- Qaar kamid ah qaababka macalimiinteydu ay iiga caawin karaan arintaan waa...
- Waxaan doonayaa inaan ka gun gaaro higsiyadaan ugu danbayn...
- Dadka i taageera waa...
- Waxayna iga caawin doonaan inaan ka gun gaaro yoolalkayga ugu danbayn...
- Qaar kamid ah waxyaabaha aan doonaayo inaan sameeyo si aan u xaqiijiyo inaan helo taageerada aan u baahan nahay waa...